# In aad noqoto guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay

Att vara nätverkshem – översättning till somaliska



**Marka ilmo aanu guriga kula noolaan karin waalidkiisa waxaa mararka qaarkood waxa ugu fiican ilmaha ay ahaan kartaa in loo geeyo qaraabo ama qof kale oo u dhow, waxa lagu magacaabo guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay. Guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay waa nooc ah guri qoys kaas oo la baaray oo ay taageereen xafiiska adeegga arrimaha bulshada.**

### Guri qoys
Guri gaar ah oo ilmaha u qaabila inuu helo daryeel iyo barbaarin joogto ah oo ay u hawl-saartay guddida bulshada.

### Guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay
Guri qoys oo ka kooban hal ama dhowr qaraabo ah ama dadka kale ee dhow.

### Qaraabo
Tusaale ahaan waalidka hooyada ama aabaha, walaalo, habar-yar iyo abtiyaal ama eed-dooyinka iyo adeerrada ilmaha.

### Dadka dhow
Tusaale ahaan saaxiibbo, deriska ilmaha iyo qoyska ilmaha ama shaqaale jooga iskoolka ama dugsiga xanaano ee ilmaha.

## Carruurta aan la noolaan karin waalidkooda

Carruurta joogta Iswiidhan badankooda waxaa laga haqab-tiraa baahidooda oo waxay qoyskooda waalidka ah kula noolyihiin xaalado amaan ah oo fiican. Laakiin carruurta qaarkood waxaa lagama maarmaan noqon karta inay ku noo-laadaan guri kale haddii xaaladdu tahay nooc ah in waalidku aanay ilmaha siin karin daryeel iyo amaanka ilmuhu u leeyahay xaqa. Xaaladaha noocaas ah waa adeegga arrimaha bulshada ee degmada ilmuhu ku noolyahay kuwa mas'uulka ka ah in ilmaha la geeyo meel ka baxsan gurigooda.

Adeegga arrimaha bulshada waa inay ugu horeyn ka fiirsadaan haddii ilmaha ay qaabili karaan qof ah qaraabo ama cid kale oo u dhow, waxa lagu magacaabo guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay. Fikradda guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay waa in uu ilmuhu awoodo haysashada xasilloonida ku jirta xiriiry-adaas iyo ku xirnaanta asalkiisa iyo shabakadda dabiiciga ah.

Adeegga arrimaha bulshada waxay mar walba sameeyaan qiimeyn ah waxa ugu fiican ilmaha oo ku salaysan xaalada gaarka u ah ilmahaas. Marar badan wax-aa u fiican ilmaha inuu la noolaado dadka u dhow laakiin xaaladaha qaarkood

Daabacaaddan waxay ku dhowrsan tahay sharciga xaqa cidda qortay. Haddi wax laga soo qaato waa in la sheegaa asalka. Haddii sawirro, masawirro iyo tusaalooyin dib loo baahinayo waxaa loo baahanyahay in oggolaansho laga helo cidda assalnimada iska leh. Daabaciddani waxaa ay iyadoo pdf ah ku jirtaa bogga Maamulka dhexe ee arrimaha bulshada.

Si qaab kale ahna waa lagu heli karaa daabaciddan haddii la dalbado. Su'aalaha ku saabsan qaabab kale waxaa loo dirayaa alternativaformat@socialstyrelsen.se

Lambar Maqaal 2022-10-8183
Sawir: Christian Ferm, Scandinav

waxaa ilmaha u fiican in uu ku noolaado meel ka baxsan shabakadda. Markaas waxaa ilmuhu caawimaad ka heli karaa adeegga arrimaha bulshada in qaab kale uu xiriirka shabakadiisa uu ula lahaado.

## Baaritaanka guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay

Haddii qaraabo ama qof u dhow rabo inuu gurigiisa ku qaabilo ilmaha, waa in adeegga arrimaha bulshada baaraa fursadahaas si la mid ah qaabka guryaha qoys ee kale loo baaro. Baaritaankan waa inuu daboolo waxyaabo ay ka mid yihiin

- xaaladda nolol ee qoyska, hoyga iyo deegaanka u dhow
- xubnaha qoyska awoodahooda shakhsi ahaan, sifooyinkooda iyo awoodooda daryeel

Adeegga arrimaha bulshada wuxuu xitaa u baahanyahay in uu xogta ku saabsan qoyska raba inuu noqdo guri qoys ka soo qaato diiwaano kala duwan, tusaale ahaan diiwaanka gaarka u ah adeega arrimaha bulshada iyo diiwaanka Booliiska ee tuhunka dembi iyo diiwaanka dembiyada. Macluumaadka qaarkood waxaa adeegga arrimaha bulshada soo qaadan karaa oo keliya haddii waalidka guriga qoyska ay oggolaadeen taas.

Adeegga arrimaha bulshada waa inay xitaa si taxaddar leh ula socdaan in ilmahan wanaag ku haysto guriga la geeyay ilmahas. Sidaas darteed ayaa ilmaha iyo qoyska ilmuhu la noolyahay si joogto ah ay booqasho uga helayaan xoghaynta arrimaha bulshada ee ilmaha inta lagu jiro wakhtiga meelayntaas socoto.

## Hawsha guriga qoyska

Marka ilmo la geeyo guri qoys, waalidka,adeega arimaha bulshada iyo guriga qoys waxa ay haystaan mas'uuliyad la saaray oo ah inay si wadajir ah uhaqab tiraan baahida ilmahaas ee xanaano, amaan barbaarin ka warhayn iyo ilaalin. Sidaas darteed waxaa guriga qoyska ay u baahanyihiin inay wada shaqayn dhow la yeeshaan adeegga arrimaha bulshada iyo kuwa haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha labadaba.

In la ahaado guri qoys waxay mararka qaarkood ahaan kartaa in

- la dhiso xiriir amaan, kalgacal iyo horumar leh oo lala yeesho ilmaha
- ka qaybqaataan in ilmuhu uu helo nolol fiican
- ilmaha laga caawiyo iskool dhigashada, tusaale ahaan dhinaca akhrinta casharada guriga iyo in la tago kulamada waalidka
- kaalmo laga gaysto in ilmuhu helo daryeel caafimaad, bukaan iyo ilkaba
- ilmaha laga taageero la xiriirka qoys iyo saaxiibada
- wada shaqayn lala yeesho mas'uuliyiinta sharci ee ilmaha wixi ah arrimaha maalinlaha ah iyo arrimaha waaweyn labadaba tusaale ahaan doorasho iskool
- wada shaqayn lala yeesho xoghaynta arrimaha bulshada iyo dadka kale ee takhasuska ah si loo haqab-tiro baahida ilmaha.

## Taageero iyo waxbarasho

Dhammaan guryaha qoys, xitaa guri xigto ama dad aqoon la isu leeyahay, waxay xaq u leeyihiin taageero iyo waxbarasho si ay u helaan fursadaha ugu fiican ee suurtagal ah si loo hayo ilmo. Taageeradan waxaa loo qaabayn karaa siyaabo kala duwan. Waxaa tusaale ahaan la siin karaa in xiriir gaar ah uu la yeesho hawl-wadeen ka tirsan adeegga arrimaha bulshada ama dhinaca hagid, si gaar ahaaneed iyo mid kooxeedba labadaba.

Taageeradan waxay u baahantahay in loo qaabeeyo si ku salaysan nooca xiriirka ilmuhu la leeyahay guriga xigto ama dad aqoon la isu leeyahay. Tusaale ahaan waalidka hooyada iyo aabaha dhalay waxay u baahan karaan taageero kale oo aan ahayn ta macallimiinti hore ee ilmaha. Waxa kale oo ay ahaan kartaa in baahida taageero ay isbaddali karto inta lagu jiro wakhtiga meelayntaas.

## Gunno

Guri qoys wuxuu xaq u leeyahay gunno marka ilmuhu u soo guuro iyaga. Gunnada guriga xigto ama dad aqoon la isu leeyahay waxay raacaysaa talooyinka si la mid ah kuwa Gobolada iyo Degmooyinka Iswiidhan ay leeyihiin ee guryaha qoys ee kale. Talooyinkaas maaha kuwo ay khasab tahay in loo hogaansamo laakiinse degmo weliba iyadaa keligeed go'aaminaysa nooca gunno ee la bixinayo. Gunnadan way isbadali kartaa inta lagu jiro wakhtiga ilmuhu meelaysan yahay maadaama xaaladuhu isbadali karaan, sida tusaale ahaan da'da ama baahida ilmaha.

**Kasii akhri in badan oo ku saabsan hawsha guriga qoyska socialstyrelsen.se/mininsats.**

